

Falu kommun, Kultur- och fritidsförvaltningen,
heshiiska kaadhka maktabada loogu talo galay carruurta

Somaliska

Kaarka maktabada ee loogu talagalay carruurta joogta kamuunka Falu, heshiis

Dhamaan carruurta joogta kamuunka Falu ee ay da'doodu tahay 6 jir ama wixii ka weyn ayaa kaarka maktabada heli kara. Kaarku waa mid qofka u gaar ah oo uu ilmaha guruga u qaadan doono. Waxaanu rabnaa inay dhamaan dadka u dhib yaraato inay buugaag deynsadaan oo ay akhristaan.

In maktabada wax laga soo deynsado

Waxa uu ilmahu iskiis kaarka maktabadda wax ugu deynsan karaa maktabadaha ku yaal Falun, Bjursås, Svärdsjö, Vika iyo baska buuggaagta. Dhamaan qof kasta oo wax deynsada ayay maktabadu diiwaan galinaysaa. Waxaad iskaa otomaatic wax kaga deynsan kartaa mashiinada ama iyadoo uu shaqaalaha maktabadu ku caawinaayo.

Shuruudaha deynsiga

Mudadda deynsiga caadi ahaan waa afar todobaad. Waxa ka dibna la soo celinayaa buugga ama dib ayaa loo deynsadaa haddii aanay cid kale saf ugu jirin inuu deynsado. Way fududahay in la iloobo in buugaagta wakhtigooda dib loogu soo celiyo. Waxay masuulka/daryeelaha u soo direysaa xasuusin ku socota iyadoo la soo maraayo e-maylka ama boostada, laakiin carruurta uma baahna inay kharashka la daahida bilaabaan. Waxa uu daryeelahu qaadayaa masuuliyada waxa uu ilmahu deynsadey illaa iyo inta uu 18 jir gaaraayo. Buugaagta carruurta ee lunta ama goo'goda ayuu mas'uulku buugiiga 150 karoon bixinayaa.

Waxaad markasta ku soo dhawaan kartaa inaad telefoonka 023-833 36 maktabada ka soo wacdo haddii aad wax isweydiineyso.

Waxaad sidoo kale e-mayl u diri kartaa: stadsbiblioteket@falun.se

Maareynta xogta shaqsiga

Xogta shakhsiga waa macluumaad kasta ee lala xiriirsin karro qof nool, tusaale ahaan lambarka shakhsiga iyo cinwaanka. Xeerka loo soo gaabiyo GDPR (Dataskyddsförordningen ama Xeerka Ilaalinta Xogta) ayaa xukumaaya sida Maktabadaha Falun ay ugu maareeyaan xogta shakhsiga ee ilmahaaga.

Waxa ay maktabadu diiwaangelinaysaa lambarka shakhsiga ee ilmaha ama lambarka LMA-ga si ay ugu soo saaraan oo ay ugu cusboonaysiiyaan magaca ilmaha iyo macluumaadka cinwaanka iyagoo Skatteverket soo maraaya. Waxaanu sidoo kale diiwaangelinaynaa waxa uu ilmahu deynsado. Waxaan taas u sameynaynaa si aanu ugu xafidno deynsiga maktabada iyo si aanu ula xiriirno carruurta iyo daryeelaha. Xeerka gundhiga u ah waa heshiiskan. Foomka ayuu baraha ilmahu soo ururin karaa oo uu u dhiibi karaa shaqaalaha maktabadda. Macluumaadka cinwaanka ayaa la haynayaa ilaa inta kaarka maktabada la isticmaalaayo. Taariikhda waxa la deynsadey ayaa si isdaba joog ah looga kala saarayaa marka buugaagta la soo celiyo. Wakaalada Kultur- och fritidsnämnden ee kamuunka Falu ayaa masuul ka ah xogta shakhsiga.

Waxaad iyadoo la raacaayo xeerka ilaalinta xogta ee GDPR leedahay xuquuq badan oo khuseeya maareynta adiga xogtaada shakhsiga, tusaale ahaan xuquuqda aad ku helyso macluumaad, xuquuqda saxitaanka iyo xuquuqda lagag soo hor jeedsanaayo maareyntayada. Miyaad dooneysaa inaad aragto xuquuqdaada markaas ayaad la soo xiriiri kartaa masuulka ilaalinta xogta ee kamuunka Falu iyadoo la soo maraayo kontaktcenter@falun.se ama telefoonka 023-830 00. Waxa www.falun.se/gdpr ku yaala macluumaad ku saabsan sida degmada Falu ay ugu maareynayso macluumaadka shaqsiga.

Waxaad www.imy.se ka helaysaa macluumaad dheeraad ah oo xuquudaada ku saabsan. Miyaad u aragtaa in kamuunka Falu ay xogtaada ugu maareeyaan si xadgudub ku ah GDPR, waxaad markaas cabasho u soo gudbin kartaa Integritetsskyddsmyndigheten (IMY), taas oo ah hay'adda kormeerka sameynaysa.



ANSAXINTA HESHIIS EE BOGGA XIGA KU YAALA
haddii aad rabto inaad kaarka maktabada ilmahaaga u qaado



Falu kommun, Kultur- och fritidsförvaltningen,
heshiiska kaadhka maktabada loogu talo galay carruurta

Waxaad kaarka maktabada weheliya fursado badan iyo laakiin sidoo kale mas'uuliyad in la ilaaliyo wixii la soo deynsadey, si ay dadka kale iyaguna ugu heli karaan.

Waxaan rabaa in ilmahaygu UU kaarka maktabada helo iyadoo aan sidaas darteed heshiiskan aqbalaayo.

[Saxeexa \(haddii ay 2 daryeele jiraan waa inay labaduba saxeexaan\)](#)

Magaca ilmaha

Lambarka shakhsiga ee ilmaha/Lambarka-LMA

Daryeelaha 1

Taariikhda

Magaca hore iyo ka danbe.....

Saxeexa.....

Daryeelaha 2

Taariikhda

Magaca hore iyo ka danbe.....

Saxeexa.....